

Waxaad tahay macallinka ugu weyn ee cunugaada. Maalin kasta, wey ku fiirsadaan, way ku dhegeystaan waxayn wax ku bartaan tusaalahaada. Waxaad sidoo kale tahay kaalmada ugu muhiimsan ee cunugaada -Ilmaha waxay si wanaagsan wax u qabtaan markii ay ku koraan bay'ad caafimaad leh halkaas oo ay ka dareemaan ammaan, in la xushmeeyo iyo in la jecelyahay- sidaa aad ugu daryeeltid ayaa waxay u lahaan doontaa isbedel weyn oo sida ay wax ugu baran lahaayeen.

Halkan waxaa ku qoran todobo shey oo muhiim ah oo aad u sameyn kartid oo ka caawiyo cunugaagu inuu wax barto:

1. IYAGA JECLAAW.

Noqo qof soo dhoweyn leh oo jecel ilmiiisa. Jacaylka u muuji adigoo iyaga eegaya, si wanaagsan ugu jawaab farrimaha jirdkooda iyo adigoo caawinaya markii ay u baahan yihiin. Noqo qof wanaagsan oo ka caawi ilmahaaga inuu dareemo inay yihiin kuwo gaar ah oo muhiim ah.

2. DHAGEYSO OO LA HADAL.

Marka aad canugaada la hadlayso, waxaad siisaa dareen buuxa. Tani waxay ka caawineysaa inay bartaan sida adiga iyo dadka kale ula hadlaan. U sheegta sheekooyin, heesida, heesaha iyo isla wada akhrinta ayaa sidoo kale hormarinaya xirfadaha dhegeysiga iyo hadalka.

3. CIYAAR, CIYAAR IYO CIYAARO KALE BADAN.

Markaad waqti la qaadato cunuggaaga waxaad ku dhiirigelineysaa koritaankooda iyo horumarkooda. U fiirso waxa ay jecel yihiin in ay ciyaaraan, ku biiraan madadaalada oo isku daya waxyaalo cusub. Waxaad sidoo kale cunugaaga u wadi kartaa ciyaarta kooxayada iyo barnaamijyada loogu talagalay qoysaska si ay uga caawiyaan inay la ciyaaraan carruurta kale.

4. WAQTI U SAMEEY CIYAARAHA FIRFIRCOON OO MAALIN KASTA AH.

Carruurta yaryar waxay u baahan yihiin inay maalin kasta firfircoonaadaan. Orodka, isu dheellitiridda iyo kor fuulista waxay dhistaa lafo adag iyo muruqyada xoogan, waxay horumarisaa xirfadaha waxayna hagaajisaa caafimaadka iyo farxadda guud.



5. KU DHIIRRI GELI CUNITAAN CAAFIMAAD LEH.

Cunugaagu wuxuu ubaahan yahay cunno caafimaad leh iyo qaab cunno caafimaad leh si uu ugu koro si xoog oo caafimaad leh. Cuntada nafaqada leh waxay cunugaada siineysaa tamar uu wax ku barto, ku ciyaaro oo ayna ku horumaraan. Cunugaada la fadhiiso marka ay wax cunayaan waqtiyada joogtada ah ee maalinta. Tani waxay sidoo kale tahay wakhti munaasab ku haboon in laisku xirmo.

6. SAMEE JADWALKA MAALINLAHA AH.

Jadwalada waxay carruurta ka caawin karaan inay dareemaan ammaan. Waxay sidoo kale yareeyn karaan dabeecadda xunxun iyo waxay kordhinta karaan madaxbannaanida. Yeelo jadwal maalin kasta ah oo soo kicida ah, qubeyska, musqul gellida, labisashada, cunto cunista iyo cuntaada fudud, tegida sariirta iyo ciyaarista (si firfircoon oo deggan). Mararka qaarkood, jadwalada barnaamijka ama dugsiga waxay u baahan tahay in la hagaajiyo si loo caawiyo cunuga baahida qabo. Tusaale ahaan, carruurta qaarkood ayaa waxay u baahan yihiin caawimo ama waqti dheeraad ah si ay u isticmaalaan musqusha ama si ay u seexdaan.

7. HUBI INUU CANUGAAGU UU HAYSTO BAARITAAN CAAFIMAAD IYO KORIINK OO JOOGTO AH.

Carruurta waxay si fiican waxa u bartaan markii ay caafimaad qawaan, si fiican wax u maqli karaan oo si fiican wax u arki karaan, oo ay cunayaan cunto caafimaad leh. Baaritaanada caafimaadka iyo talaaladu ayaa waxay ka caawin karaan in ilmahaaga uu caafimaad lahaado. Haddii aad ka welwelsan tahay horumarka ilmahaaga ama sida ay u qabtaan barnaamijka waxaad sidoo kale la hadli kartaa shaqaalaha barnaamijka.

Waxaa laga soo guuriyay Best Start Resource Center iyadoo la ogolyahay.

Booqo cmascanada.ca/cnc/parents wixii macluumaad dheeraad ah oo waalidiinta laba luuqadlaha ah



SUPPORTING CHILD CARE IN THE SETTLEMENT COMMUNITY / SOUTIEN DE LA GARDE DES ENFANTS DANS LA COMMUNAUTÉ DE RÈGLEMENT

Funded by: Immigration, Refugees and Citizenship Canada / Financé par : Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada